Australian Government

COVID-19 VACCINATION

Ka dib tallaalkaaga Spikevax (Moderna) COVID-19

Markii ugu dambeysay ee la cusbooneysiiyay: 2 Sebtember 2021

Ku saabsan tallaalka

Maanta waxaad qaadatey tallaalka **Spikevax** (**Moderna) vaccine**.

Tallaalkani wuxuu ka hortegi karaa dadku inay ka bukoodaan COVID-19. Tallaalka Moderna COVID-19 kuma jiro fayras nool, kumana qaadsiin karo COVID-19. Waxay ka kooban tahay koodh hidde-side qayb muhiim ah oo ka mid ah fayraska SARS-CoV-2 oo loo yaqaan borotiinka spike. Tallaalka ka dib, jidhkaagu wuxuu sameeyaa nuqulo ka mid ah borotiinka. Nidaamkaaga difaaca ayaa markaa baran doona garashada iyo la-dagaallanka fayraska SARS-CoV-2. Xeerka hidda -wadaha ayaa jidhku degdeg u burburiyaa.

Waxa la filayo tallaalka kadib

Sida tallaal kasta, waxaa laga yaabaa inaad yeelatid waxyeellooyin ka dib markaad qaadatid tallaalka COVID-19.

Waxyeellooyinka **guud** ee ka dambeeya **Moderna** waxaa ka mid ah:

- xanuun meesha la mudey
- daal
- madax xanuun
- muruq xanuun
- xumad iyo qarqaryo
- xanuun wadajir ah.

Waxyeellooyinka aan **caadiga** ahayn ka dib **Moderna** waxaa ka mid ah:

- casaan ama barar meesha lagaa muday
- bararka ama damqashada kilkilaha
- lalabo/matag
- Qanjidhada lymph oo la weynaada.

Dhibaatooyinkan soo noqnoqda badanaa waa khafiif waxayna badanaaba ku baxaan laba ama saddex maalmood gudahood. Dadka qaarkood waxay la kulmi doonaan astaamo u eg hargab oo kale tallaalkan marka la barbar dhigo tallaalada kale ee caadiga ah waxaana laga yaabaa inay u baahdaan waqti ka fog hawlaha caadiga ah. Calaamadahaasi waxay dhici karaan labada dhoos midkood laakiin aad bay u badan yihiin qiyaasta labaad kadib.

Haddii aad dareentid xanuun meesha la mudey ama xumad, madax -xanuun ama jidh-xanuun ka dib tallaalka, waxaad qaadan kartaa paracetamol ama ibuprofen. Kuwani waxay caawiyaan yareynta qaar ka mid ah astaamaha kor ku xusan. Uma baahnid inaad qaadatid paracetamol ama ibuprofen tallaalka ka hor. Haddii ay bararto meesha la mudey, waxaad isticmaali kartaa cadaadis qabow.

Waxyeellooyinka **dhif** ah ee la soo sheegay ka dib **Moderna** waa:

- Falcelin xasaasiyad daran (anaphylaxis).
- Myocarditis (barar ku dhaca muruqa wadnaha) iyo pericarditis (barar daboolka sare ee wadnaha). Kiisaska la soo sheegay badidoodu waxay ahaayeen kuwo khafiif ah oo si dhaqso leh looga soo kabsaday, inkasta oo dabagalka muddada dheer ee kiisaskaani uu socdo. Kiisaska ayaa inta badan dhaca dhooska labaad iyo inta badan ragga yaryar (da'doodu <30 sano).

Waa inaad raadsataa daryeel caafimaad tallaalka ka dib haddii:

- aad u malaynaysid inaad leedahay dareen-celin xasaasiyad. Wac 000 haddii aad la kulantid calaamado daran, sida neefsashada oo ku adkaata, xiiq, garaaca wadnaha oo degdeg ah ama dillaaca
- Waxaad qabtaa laab xanuun, cadaadis ama raaxo -darro, garaaca wadnaha oo aan joogto ahayn, garaacis ka booday ama ‘gariirid’, miyir beelid, neefta oo ku qabata ama xanuun marka aad neefsanaysid
- Waxaad ka welwelsan tahay waxyeellada ka dhalata ama aad leedahay calaamado cusub ama lama filaan ah
- Waxaad leedahay waxyeellada la filayo tallaalka, oo aan tagin dhawr maalmood ka dib.

Calaamadaha aan degdegga ahayn, waxaad arki kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaad ee caadiga ah (badanaa GP -gaaga).

Kormeerka badbaadada tallaalka iyo ka warbixinta waxyeelooyinka

Waxaad u sheegi kartaa waxyeellooyinka soo raaca tallaalka bixiyahaaga ama xirfadle daryeel caafimaad kale. Waxay markaa ka dhigi doonaan warbixin rasmi ah adiga oo ku matalaya oo ay u direyaan waaxda caafimaadka gobolkaaga ama taritorigaaga ama si toos ah Therapeutic Goods Administration (TGA).

Haddii aad doorbideysid inaad adigu soo sheegtid, fadlan booqo warbixinta looga shakisan yahay waxyeellooyinka ka yimaada ee la xidhiidha bogga tallaalka COVID-19 ee mareegaha TGA oo raac tilmaamaha bogga.

Isbaadhitaanka COVID-19 tallaalka kadib

Waxyeellooyinka qaarkood ee ka yimaada tallaalka COVID-19 waxay la mid noqon karaan astaamaha COVID-19 (tusaale qandho). Si kastaba ha noqotee, Moderna kuma jiro fayras nool mana sababi karo COVID-19. Waxaa laga yaabaa inaadan u baahnayn inaad saysid isbaardhitaanka COVID-19 ama aad isgo'doomisid:

- Haddii aad yeelatid calaamado guud sida xumad, madax -xanuun ama daal labadii maalmood ee ugu horreeyey tallaalka ka dib, iyo

- Haddii aad hubtid inaadan lahayn astaamaha neefsashada (tusaale sanka oo duufsan, qufac, cuno xanuun, lumista urta ama dhadhanka).

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad hubisaa tilmaamaha hadda jira ee gobolkaaga/territorigaaga si aad u heshid macluumaadka ugu dambeeyay. Taladaani way is beddeli kartaa haddii uu COVID-19 ka ka dillaaco degmadaada. Waxaa laga yaabaa inaad wali u baahatid inaad sameysiidid baadhitaanka COVID-19 haddii aad buuxisid shuruudo kale, tusaale ahaan haddii aad tahay qof xidhiidh dhow la leh kiis COVID-19 la yaqaan. Haddii aad ka shakidid, raadso qiimeyn caafimaad.

Xusuusnow ballantaada labaad

Waa muhiim inaad qaadatid laba dhoos oo Moderna ah. Qiyaasahaas guud ahaan waxaa loo dhaxeyeysiiyaa 4-6 toddobaad, laakiin waqtiyo dheer ayaa laga yaabaa in lagu taliyo duruufo gaar ah. Qiyaasta labaad waxay u badan tahay inay sii dheeraato muddada ka-hortagga COVID-19.

Sidee loo isticmaalaa macluumaadka aad ku bixisay ballantaada

Macluumaad ku saabsan sida faahfaahintaada shakhsiyeed loo ururiyo, loo kaydiyo loona isticmaalo booqo https://www.health.gov.au/using-our-websites/privacy/privacy-notice-for-covid-19-vaccinations